


Arredondo Juan/Getty Images/CICR

# TARTANKA QORMOOYINKA 19AAD EE ICRC EE JAAMACADAHA BARIGA AFRIKA

## SU'AASHA

"Astaanta udub dhexaadka u ah is-badalka juquraafi iyo siyaasadeed ee tobankii sano ee la soo dhaafay ayaa ahaa kororka kooxaha hubeysan ee aan dowladda ka tirsaneyn. Qaar ka mid ah colaadihii ugu danbeeyay ee ugu dhibka badnaa, ayaa falanqeeyeyaashu waxa ay arkeen boqolaal, haddii aysan aheyn komanaan, kooxaha ku lugta leh rabshadaha hubeysan. Tiradooda, qaab dhismeedkooda, iyo awooddoodu aad bey u kala duwan yihiin. Iyada oo kooxo waaweyn oo maamul iyo nidaam dhexe leh ay wali jiraan, ayaa waxaa sidoo kale jira kooxo kale oo aan laheyn maamul dhexe oo u wada shaqeeya qaab is-baheysi ah oo aan hal meel taagneyn. Kooxahan hubeysan ee tirada badan, ayaa waxa ku kallifaya rabshadaha ay u muuqdaan, kuwo u isugu jira dano siyaasadeed, diimeed, ama danbi." Warbixinta ICRC-da sanadka 2019 ee Sharciga Caalamiga ah ee bani'aadamnimada iyo caqabadaha colaadaha hubeysan ee casriga ah.

Tiro badnida kooxaha hubeysan iyo habka ay u howl galaan ayaa sare u qaadaya caqabado qaanuun oo badan iyo kuwo muuqda oo ku saabsan sidii Sharciga Caalamiga ee Bani'aadamnimada loogu dabbaqi lahaa colaadaha ay ku lugta leeyihiin kooxo badan oo hubeysan oo aan dowladda ka tirsaneyn; nidaamka sharciga ah ee ilaalinaya dadka ku nool meelaha ay maamulaan kooxaha hubeysan oo aan dowladda ka tirsaneyn; iyo caqabadaha sharci iyo kuwa muuqda ee la xiriira xabsiyada kooxaha hubeysan.

*Si qoto dheer u falanqee caqabadaha sharci iyo kuwo muuqda ee lagu xusay hadalka kore.*

## TILMAAMAHA

- Tartanku waxa uu u furanyahay dhammaan ardeyda heerka koowaad ee jaamacadaha Bariga Afrika.
- Qoraalladu waa in ay kumbuyuutar ku qornaadaan, oo si wanaagsan tixraaca loogu sameeyo loona qaabeeyo, sidoo kalena la xusaa buugaagtii laga soo xigtay.
- Qoraal kasta oo lagu helo in la khiyaanay waa laga reebi doonaa taranka.
- Qoraalladu waa in aysan ka badnaanin 4000 oo eray (oo ay ku jiraan qoraallada beyjajka hoos looga qoro oo aysan ku jirin buugaagta wax laga soo xigto)
- Qoraalka iyo nuqul aqoonsiga ardeyga ah waa in lagu soo diraa xafiiska Nairobi ugu danbeyn 30ka Juun 2021 iyada oo la adeegsanayo Email (nai_com@icrc.org). Soo dirista wixii xilligaa ka danbeeya lama aqbali doono.
- Guuleystaha tartanka ayaa waxa uu heli doonaa abaaalmarin lacageed. Waxaa kale oo abaalmarin heli doona dadka gala kaalmaha 2aad iyo 3aad, iyo sidoo kale qoraalka ugu wanaagsanaada wadan kasta.

## HAGAHA QIIMEYNTA

Ka qeybgaleyaasha waxaa lagu qiimeyn doonaa dooddooda maan-galka ah, qot-dheerida ay jawaabahooda u sameeyaan, qaab-dhismeedka qoraalka, iyo muujinta aqoonta ay u leeyihiin mowduuca ay ka hadlayaan. Mid kasta oo ka mid ah hal-beegyada ayaa lagu bixin doonaa dhibco sida hoos ku xusan:

| Aqoonta mowduuca | Fikir xeel-dheer iyo falanqeyn | Dhismaha, Tixraaca, iyo Daliilka cilmi baarista | Tiro Guud |
|---|---|---|---|
| 40 | 30 | 30 | 100 |

## CASH PRIZES

- Qoraalka ugu wanaagsan – CHF 350
- Qoraalka 2aad ee ugu wanaagsan – CHF 250
- Qoraalka 3aad ee ugu wanaagsan – CHF 100
- Qoraalka ugu wanaagsan wadan kasta– CHF 50

**Faahfaahin dheeri ah kala xiriir:**
Guddiga Caalamiga ah ee Laanqeyrta Cas,
Waaxda Warbaahinta, Ergada Soomaaliya,
Wadjir District, Buulo Hubey Quarters,
Tel: 05844110 ama Mohamed Khalif +252907948803 / 252614243716
Email: mkhalifibrahim@icrc.org
www.icrc.org

ICRC